Ku soo dhowow isticmaalka maktabadaha Helmet!

Marka aad doonayso in aad maktabadda isticmaasho,
waa muhiim, in aad taqaan sharciydan isticmaalka islamarkaasna aad u hoggaansanto.

Waa maxay Helmet?

Maktabadaha Helmet waxay ka shaqeeyaan Helsinki,
Espoo, Kauniainen iyo Vantaa.
Helmet waa adeegga wadajirka ah ee maktabadaha magaalooyinka.

Helmet waxaa laga soo gaabiyay erayada
”Helsinki Metropolitan Area Libraries”,
afka soomaaliga waa ”maktabadaha soonaha caasimadda”.

Maktabadaha Helmet waxay leeyihiin rajistareeshinka
macaamiisha iyo nidaamka maktabadda oo wadajir ah.
Taas waxay ka dhigantahay, in aad isticmaali karto
dhammaan maktabadaha Helmet, haddii aad haysato
kaarka maktabadda ee Helmet.

Maktabadaha Helmet waa kuwa dadka oo dhan u furan.
Waxaad ku aqrisan kartaa kana ammaahan kartaa buugaag
waxaad sidoo kale isticmaali kartaa adeegyada iyo qolalka maktabadda.
Marka aad tahay isticmaalaha maktabadda, waxaad
sidoo kale mas’uul ka tahay
agabka, qalabka iyo qolalka maktabadda.
Kuwaas si khalad ah looma isticmaalo karo.

Xusuusnow in aad u hoggaansanto sharciyada maktabadda

Marka aad hesho kaarka maktabadda,
waxaad ballanqaadday in aad raacayso sharciyada maktabadda

Waxaa kale oo ay isla sharciyadan quseeyaan qofka xiriirka ah.
Qofka xiriirka ah waa tusaale ahaan shaqaale dugsiga
ama qayb,
kaas oo haysta kaarka maktabadda ee qaybta.
Qofka xiriirka ah wuxuu mas'uul ka yahay, in
dhammaan shaqaalaha qaybtiisu ay kaarka
maktabadda u isticmaalaan si sax ah.

Kaarka maktabada iyo lambarka aqoonsiga

Kaarka maktabadda

Marka aad haysato kaarka maktabadda,
waxaad xaq u leedahay in aad maktabadda ka amaahato
buugaag iyo agabyo kale.

Kaarkaada maktabadda waxaad ka heleysaa maktabad
kasta ee Helmet ama baabuurka maktabadda.

Kaarka maktabadda waxaad la qaadanaysaa lambarka aqoonsiga,
kaas oo uu kaarku kuugu shaqaynayo.
Kaarka maktabadda ee ugu horreeya waa lacag la'aan.

Kaarka maktabaddu waa mid shakhsiga u gaar ah
Kaarka maktabaddu waa mid shakhsiga u gaar ah.
Qof kale ma isticmaali karo.
Kaarka ma siin kartid dadka kale xittaa marka,
aad isticmaalayso maktabadda aad ismaamulayso.
Maktabadda uu qofku ismaamulayo ma joogaan
shaqaalaha maktabadda ee macaamilku isaga ayaa iskiis
u amaahanaya islamarkaasna u soo celinaya buugaagta iyo agabyada kale.

Haddii aad dareento ama ka baqato,
in qof kale uu kaarkaada maktabadda isticmaalo,
ka codso shaqaalaha maktabadda caawimaad.

Shaqaaluhu wuxuu marksta hubin karaan aqoonsiga qofka,
marka uu qof kale kaarkaada wax ku amaahanayo.
Qof kale markaas ma isticmaalo kaarkaada.

Marka aad maktabadda ka amaahanayso buugaag ama
agabyo kale, adiga ayaa agabyadaas ka mas'uul ah.
Waa in la soo celiyaa agabkaas iyagoo ay xaaladdoodu fiicantahay.

Haddii uu kaarka maktabaddu yahay kaar ka dhexeeya
dugsi ama qayb kale,
waxaa isticmaali karaa shaqaalaha kale ee qaybtaas.
Kaarka waxaa ka mas'uul ah qofk xiriirka,
isaga ayaa bixinaya oggolaanshaha isticmaalka kaarka.

Sidee lagu helaa kaarka maktabadda?
Kaarka maktabadda waxaad heleysaa, marka aad
aqoonsigaada caddayso cinwaankaada sheegto.
Kaarkaada maktabadda waxaad ka heleysaa maktabad
kasta ee Helmet ama baabuurka maktabadda.

Kaarka maktabadda waxaad heleysaa oo kaliya,
haddii aad cinwaan ku leedahay Finland.
Waa in aad sidoo kale tustaa aqoonsigaada, kaas oo uu
ku dhegganyahay sawirkaada iyo lambarkaada aqoonsiga.
Maktabadda waxaa lagu isticmaali karaa aqoonsiyadan soosocda:

- Aqoonsiyada waddamada Midowga Yurub
- baasaboor
- laysinka wadista baabuurta ee Finnishka

- Kaarka KELA:da ee sawirka leh, dadka kayar 18 sano waxaa u shaqaynaya kaarka KELA:da ee aan sawirka lahayn.
- Kaarka deganaha ee xarunta qaabilaadda qaxootiga ee Finland ku taal.
- Kaarka sharciga deganaanshaha ee ay Hay'adda socdaalku bixisay.

Haddii aadan lahayn lambarka aqoonsiga Finnishka,

kaarkaada maktabaddu wuxuu markiiba shaqaynayaa sannad.

Cunugga 15 sano kayar wuxuu kaarka maktabadda helayaa oo kaliya,

haddii uu waalidkiis oggolyahay.

Inta badan waalidku waa aabaha ama hooyada,

mararka qaarna waa qof mas'uul ah.

Waalidku waa in uu bixiyaa oggolaansho qoraal ah oo ku saabsan,

in cunugga la siin karo kaarka maktabadda.

Waalidka ayaa mas'uul ka ah wixii kaarka lagu amaahdo,

haddii qof kayar 15 sano uu maktabadda wax ka ammaahdo.

Haddii uu tusaale ahaan da'yarku dhumiyo buugga maktabadda,

waa in uu waalidku magdhabaa.

Kaarka maktabadda waxaa sidoo kale heli kara tusaale

xannaanada, dugsiga, qayb kale ama jimciyad.

Waa in ay leeyihiin qof lagala xiriiro,

kaas oo mas'uul ka ah isticmaalka kaarka.

Qofka xiriirka ah wuxuu ku dadaalayaa, in

shaqaalaha qaybtiisu ay kaarka maktabadda si sax u ah u isticmaalaan.

Kaararka maktabadda ee qaybuhu waxay markiiba shaqaynayaan sannad.

Ku wargeli maktabadda haddii uu kaarka maktabaddu dhumo.

Haddii uu kaarkaada maktabaddu dhumo,

islamarkiiba ku wargeli maktabadda.

Qofka xiriirka qaabilsan ayaa lumista soo sheegaya,

haddii kaarka maktabadda ee wadajir ah ee qaybtu uu dhumo.

Haddii ay maktabaddu xirantahay, waxaad dhumista
kaarka ku wargelin kartaa, cajaladda telefoonka ku xiran.
Waxaad markaas wacdaa lambarka 09 3108 5309.

Marka aad soo sheegto in kaarka maktabaddu uu
dhumay, maktabadda ayaa isticmaalkiisa kansalaysa.
Haddii uu qof kale iskudayo in uu kaarkaada wax ku
amaahdo wargelinta kaddib, wixii lagu amaahday adigu mas'uul kama tihid.

Lambarka aqoonsiga

Lambarka aqoonsiga ayaa kaarka maktabaddu loogu baahanyahay.

Waxaa adeegsigiisa loo isticmaali karaa

- adeegyada shabakadda ee maktabadda,
- mashiinnada amaahashada ee otomaatigga ah
- kambuyuutarada
- iyo maktabadda uu qofku ismaamulo.

Lambarka aqoonsiga waxaad u baahantahay tusaale marka,
aad agab amaahanayso adigoo isticmaalaya mashiinka amaahashada ee otomaatigga ah,
Lambarka aqoonsiga la'aantiis ma isticmaali kartid otomaatigga.

Lambarka aqoonsiga waxaad ka heleysaa maktabadda ama baabuurka maktabadda,
marka aad tusto aqoonsigaada.
Lambarka aqoonsiga laguma helayo iimaylka ama telefoonka.

Ku wargeli maktabadda macluumaadkaada
Ku dadaal, in macluumaadka
xiriirka ee saxda ah uu yaal maktabadda.
Haddii cinwaankaada, iimaylkaada
ama magacaadu uu isbeddelo, ku wargeli maktabadda.
Macluumaadkaada waxaad ka hubsan kartaa,
marka aad gudaha u gasho bogagga internetka ee maktabadda
cinwaanka www.helmet.fi.

Macluumaadkaada xiriirka waxaa laga helayaa bogga-Omat tiedot.

Dhammaan macluumaadyada shakhsiga ee dadka wax
amaahda waxay ku jiraan rajistareeshinka maktabadda.
Waxaa kale oo halkaas ku jira maclumaadyada
dadka mas'uulka ah iyo dadka xiriirka qaabilsan.

Maktabaddu waxay mas'uul ka tahay, in
macluumaadyada maktabadda lagu wargeliyay
ay iyagoo sax ah ku jiraan rajistareeshinka macaamiisha.

Maktabaddu waxay haynta rajistareeshinka macaamiilka
ugu hoggaansantaa sharciga macluumaadka qofka.
Sida uu qabo sharciga macluumaadka qofku maktabaddu
waxay xaq u leedahay in ay rajistareyso lambarka aqoonsiga ee qofka.

Waxaad xaq u leedahay in aad hubiso,
macluumaadyada kugu saabsan ee ku jira rajistareeshinka maktabadda.
Adeegga macaamiisha ee maktabadda ayaad ka heleysaa macluumaadka,
marka aad tusto aqoonsigaada.
Haddii aad tahay mas'uulka cunugga 15 sano kayar,
waxaad arki kartaa macluumaadkiisa,
tusaale ahaan macluumaadka amaahyada soo daahay.
Waxaa kale oo aad heleysaa macluumaadka lacagaha aanu bixin.
Haddii aad tahay qofka xiriirka u qaabilsan qayb,
waxaad xaq u leedahay in aad hubiso macluumaadka qaybta.

Haddii aad doonayso macluumaad dheeraad ah oo ku
saabsan rajistareeshinka macaamiisha, waxaad ka heleysaa warbixinta rajistareeshinka.

Warbixinta rajistareeshinka waxaa laga helaa maktabadaha iyo boggga Helmet cinwaanka Warbixinta rajistareeshinka [LINKIGA].

Warbixinta rajistareeshinku kuma qorna luqad fudud.

Amaahashada, soo celinta iyo cusboonaysiinta

Amaahashada

Wakhtiyada amaahdu waa 1-28 maalmood.

Agabyada kala duwan waxay leeyihiin wakhtiyo la amaahdo oo kala duwan.

Wakhtiyada amaahda ee rasmiga ah waxaad ka heleysaa

lifaaqa sharciyada isticmaalka.

Waxaad markiiba amaah ahaan u haysan kartaa ugu badnaan 100 amaahood.

Marka aad amaahanayso buugaa ama agab kale,

waxaad heleysaa maalinta amaahda ugu dambeysa.

Maalinta amaahda ugu dambeysa waa maalinta ay tahay,

in ugu dambeyn amaahda la soo celiyo.

Maalmaha ugu dambeeya waxay ka muuqdaan rasiidka

maalinta ugu dabaysa, kaas oo aad heleyso markaad amaahda qaadanayso.

Filimaanta ama ciyaaraha lama amaahiyo macaamiilka

aan buuxin xadka da'da loogu talaggalay.

Tusaale ahaan dadka kayar 15 sano ma amaahan karaan

filimaan ama ciyaaro, kuwaas oo xadka da'doodu ay tahay 15 sano.

Finland waxaa xadka da'da go'aamiya Machadka maqal-muuqaalka ee qaranka Kavi

iyo Waaxda waxbarashada fahamka warbaahinta iyo barnaamijka sawirka MEKU.

Soo celinta

Soo celi amaahda ugu dambayn maalinta ugu dambeysa.

Uma baahnid in aad agabka u soo celiso isla maktabaddi

aad agabkaas ka amaahatay.

Amaahda waxaad ku celin kartaa

maktabad kasta oo ay Helmet leedahay.

Haddii aad doonayso , waxaad agabka aad celisay ka heleysaa rasiid.

Maktabadaha qaar waxay leeyihiin maqal ama dalool agabka lagu celiyo.
Amaahda waxaa maqalka lagu soo celin karaa marka ay
maktabaddu xirantahay.
Maktabaddu waxay agabka ku qoraysaa in la soo celiyo
maalinta xigta ee ay furantahay.
Haddii aad amaahda ku soo celiso maqalka soo celinta,
adiga ayaa mas'uul ka ah waxyaabaha aad soo celisay.
Haddii ay tusaale ahaan maqalka soo celinta wax ka dhumaan,
waxay noqonaysaa in aad magto agabka dhumay.

Marka ay maalinta ugu dambeysa soo dhowaato,
waxaad heli kartaa wargelinta arrintaas labo maalmood kahor.
Iimaylka ayaa ogeysiisyada laguugu soo dirayaa,
haddii ay maktabaddu hayso iimaylkaada.
Si kastaba waa in aad maktabadda ku wargelisaa,
in aad doonayso in ogeysiiysada iimayl laguugu soo diro.

Cusboonaysiinta

Waad cusboonaysiin kartaa amaahda, yacni isla agabka
aad amaahatay ayaad shan jeer isku xigta cusboonaysiin kartaa.
Amaahda waxaa lagu cusboonaysiin karaa maktabadda, baabuurka maktabadda
internetka, bogga www.helmet.fi.
Waa in aad gudaha u gashaa bogga-Oma tiedot.
Si aad u gasho, waxaad u baahantahay lambarka kaarka maktabadda
iyo lambarka aqoonsiga.

Ma cusboonaysiisan kartid amaah, haddii qof kale
uu isla agabkaas xajistay ama ballansaday.
Ma cusboonaysiisan kartid amaah sidoo kale, haddii

aad lumisay xaqaada wax amaahashada.

Si kastaba, agabyada oo dhan lama cusboonaysiin karo.
Tusaale agabyada Bestseller lama cusboonaysiin karo,
agabyo badan oo la amaahdana ma ahan kuwa
markale la amaahan karo.

Xajisashada iyo meel fog ka soo amaahashada

Waad xajisan kartaa agabyada maktabadda
Haddii aad doonayso in aad agab xajisato,
waxaad xajisashada ka samayn kartaa maktabadda.
Waxaa kale oo xajisashada laga samayn karaa boggaga
internetka ee maktabadda cinwaanka www.helmet.fi.
Waa in aad marka hore gudaha u gashaa macluumaadyadaada.
Si aad u gasho, waxaad u baahantahay lambarka kaarka
maktabadda iyo lambarka aqoonsiga.

Waxaad markiiba xajisan kartaa 50 xajisasho.
Waxaad heleysaa wargelinta, marka aad maktabadda ka
soo qaadan karto agabka aad xajisatay.
Wargelintu waxaad ku heli kartaa warqad,
iimayl ama farriin qoraal ah.

Si kastaba, agabyada oo dhan lama xajisan karo,
tusaale alaabta, sida qalabka farsamada ama kabaha barafka lagula dul taraaraxo.
Labadoodaba maktabadda ayaa laga amaahan karaa.

Meel fog ka soo amaahashada

Haddii aad doonayso inaad xajisasto agab,
kaas oo aan laga heleyn maktabadaha Helmet,
maktabadda ayaa kaaga soo amaahan karta meel kale

oo gudaha Finland ama dibadda ah.
Meel fog ka soo amaahashadu waa lacag.

Maktabaduhu meel fog kama soo amaahdaan agabka,
laga helo maktabadaha kale ee soonaha caasimadda ku yaal,
tusaale ahaan maktabad cilmiyeedka
ama maktabad gaar ah.

Lacagaha maktabadda

Sida guud isticmaalka maktabaddu waa lacag la'aan.
Si kastaba, haddii aad la soo daahdo soocelinta agabka,
waa in aad bixisaa lacagta la soo daahista.
Haddii aadan qaadan agabki aad xajisatay,
waa in qaadasho la'aantaas aad lacag ka bixisaa.
Haddii aad dhumiso hantida maktabadda,
waa in aad hantidaas magdhowdaa.
Waa in sidoo kale lacag laga bixiyaa adeegyada gaarka ah,
tusaale ahaan meel fog ka soo amaahashada.

Waad hubin kartaa lacagaha maktabadda lagu bixiyo
nooca ay yihiin.
Lacagaha la bixiyo oo dhan waxaad ka heleysaa lifaaqa sharciyada isticmaalka (LINKIGA).

Maktabaddu mas'uul kama ahan, haddii
agabka aad amaahatay uu waxyeelleeyo u geysto qalabkaada.
Maktabaddu magdhow kama bixinayso waxyeellada qalabkaada gaarta.
Waxaa kale oo aanay maktabaddu magdhabayn
waxyeellooyinka ka dasha, haddii aad wax ku jebiso
qalabka farsamada ee maktabadda.

Lacagta la soo daahista iyo magdhabista

Haddii aad la soo daahdo soocelinta agabka,
waa in aad bixisaa lacagta la soo daahista.
Lacag bixintu waxay ka dhalanaysaa maalin kasta oo uu
agabku daaho, illaa ay ka buuxsamayso cadadda ugu badan ee lacagaha la bixiyo.

Agabka qaybta carruurta iyo dhallinyarada lagama bixiyo
si kastaba ha ahaatee lacag la soo daahista.

Lacagta la soo daahista waa in xittaa la bixiyaa marka ay
jirto xaalad aadan ammaahdaada cusboonaysiin karin
cillad farsamo oo jirta darteed.
Cillad farsamo waa tusalaale ahaan,
internetka oo shaqayn waaya.

Haddii aad dhumiso ama waxyeelleyso hantida maktabadda,
waa in aad magdhowdaa agabkaas.
Tilmaamaha rasmiga ah ee magdhabista agabka waxaad
ka heleysaa lifaaqa sharciga isticmaalka.

Amaahyada soo daahay iyo lacag bixinta
Haddii ay amaahdaadu daahday,
waxaad heleysaa labo xusuusin.
Xusuusinta koowaad waxay imaanaysaa
14 maalmood kaddib maalinta ugu dambeysa amaahda.
Xusuusinta labaad waxay imaanaysay
28 maalmood kaddib maalinta ugu dambeysa amaahda.
Waa suuragal in xusuusinta koowaad lagu helo
iimaylka.

Marka aad hesho xusuusinta, waa in aad
agabka u celisaa maktabadda islamarkaasna bixisaa

lacagta la soo daahista agabka.

Maxaa dhacaya haddii aadan bixin lacagaha?

Haddii aadan maktabadda siin lacagteeda, maktabaddu

waxay isticmaalaysaa xafiiska deyn soo celinta

Lacaguhu waxay ka wareegayaan maktabadda waxayna u wareegayaan xafiiska deyn soo celinta,

marka ay maalinta ugu dambeysa amaahda ka soo wareegto 60 maalmood.

Deymaha dadka qaangaarka ah oo kaliya ayaa u wareegi kara deyn soo celinta.

Haddii uu macaamilku kayar yahay 18 sano,

deymuhu uma wareegayaan deyn soo celinta.

Haddii aad doonayso macluumaad dheeraad ah oo ku

saabsan deyn soo celinta, waxaad macluumaad ka heleysaa lifaaqa sharciga isticmaalka (LIKINGA).

Luminta xaqa amaahashada agabka

Haddii aadan deynta siin maktabadda,

waxaa lagaa mamnuuci karaa isticmaalka maktabadda.

Waxaad markaas luminaysaa xaqaada amaahashada

yacni agab kama amaahan kartid maktabadda.

Waxaad luminaysaa xaqaada amaahashada, haddii

- amaahdaadu ay daahdo wax ka badan 28 maalmood
- aad dhumisay agabka maktabadda
- aad waxyeelleysay agabka maktabadda
- ay maktabaddu kugu leedahay deynta ugu badan.

Waxaad lifaaqa sharciga isticmaalka ka hubin kartaa (LINKIGA),

cadadda ugu badan ee deyntu waxa ay tahay.

Sharcigan wuxuu leeyahay hal arrin oo aan lagu dhaqmin:

Haddii aad ku jirto nidamaka dib-u-qorshaynta deynta

deynka maktabadduna uu ku jiro barnaamijkaas lacag bixinta ah,

ma luminaysid xaqaada amaahashada.

Soo celinta xaqa amaahashada agabka

Waxaad xaqaada amaahashada soo ceshanaysaa, marka

- aad maktabadda u celiso agabki soo daahay
- aad magdhowdo agabki lumay ama ay waxyeelladu gaartay
- aad maktadda siiso deynki ay kugu lahayd.

Soo laabashada xaqa amaahashadu wuxuu qaadanayaa qiyaastii todobaad,

wuxuuse ku xiran yahay, sida aad deyntaada u bixiso.

Haddii aad deynta ku bixisay akoonka maktabadda,

qaybta xisaabtinta maktabadda ayaa hubinaysa lacag bixinta.

Marka ay lacag bixinta hagaagto,

waxaad markale agab ka amaahan kartaa maktabadda.

Haddii deynta laguugu leeyahay ay jirto

deynta soo celinta, arrinta deynta waxaa u xilsaaran xafiiska deyn soo celinta.

Waa in aad markaas lacagta deynta siisaa xafiiska deyn soo celinta,

xafiiska deyn soo celintuna wuxuu deynta siinayaa maktabadda.

Maktabadda ayaa ugu dambeyn hubinaysa lacag bixinta.

Marka ay wax walba hagaagaan,

waxaad markale agab ka amaahan kartaa maktabadda.

Mamnuucista isticmaalka maktabadda

Waxaad lumin kartaa xaqaada isticmaalka maktabadda,

haddii aadan u hoggaansamin sharciga isticmaalka maktabadda.

Mamnuucista isticmaalku wuxuu imaan kartaa, marka

aad qashqashaad ka samayso maktabadda dhexdeeda,

aad halis-geliso ammaanka gudaha maktabadda

ama aad waxyeelleyso hantida maktabadda.

Mamnuucista isticmaalku waa mid ku meelgaar ah,

waxay noqon kartaa ugu badnaan 30 maalmood.

Maktabaddu waxay mamnuucista isticmaalka ka samaynaysaa go’aan rasmi ah.
Xaq ayaad u leedahay in aad go’aan racfaan ka qaadato
islamarkaasna codsato in la beddelo go’aanka.
Kahor inta aan lagaa mamnuucin isticmaalka,
waxaad xaq u leedahay in aad sheegto
aragtidaada ku aaddan arrinkan.

Haddii lagaa mamnuuco isticmaalka maktabadda,
waxaa lagu calaamadaynaaa rajistareeshinka macaamiisha ee maktabadda.
Maktabadda ayaa calaamadda ka saaraysay meesha,
marka aad dib u hesho xaqa isticmaalka maktabadda.

Sidee ayeey u shaqeeyaan sharciyada isticmaalku?
Sharciyada isticmaalka waxaa la beddelayaa oo kaliya,
marka wax ka beddelista laga gaaro go’aan rasmi ah.
Baabuurta maktabadda, maktabadaha qaybaha
iyo adeegga guriga ee maktabaduhu xitaa
waxay raacayaan sharciyadan isticmaalka, haddii ay suuragal tahay.

Sharciyadan isticmaalku waxay shaqaynayaa
laga billaabo 1.2.2021 illaa iyo wakhti aan la cayimin.
Wakhtiga joojinta sharciyadu waa lix bilood.
Sharciyadan isticmaalku waxay burinayaan sharciyadi hore,
kuwaas oo ay maktabaddu ansixisay 1.3.2018.

Macluumaad dheeraad ah
Lifaaqa sharciyada isticmaalka iyo macluumaad
dheeraad ah oo ku qoran af finnish waxaad ka heleysaa bogagga Helmet cinwaanka Macaamiil ka noqoshada maktabadda (LINKIGA)